

Dib-u cusboonaysiinta Caynsanaantaada Apple Health



Caysanaanta Apple Health (Medicaid) waa in dib loo cusboonaysiiyo sanad kasta si loo joogteeyo caynsanaanta caafimaadka. Waxaad helayaa waraaqdan sababta oo ah waxaad u baahan tahay in aad tallaabo qaado si aad u cusboonaysiiso caynsanaantaada ama caynsanaanta qof jooga gurigaaga. Waxaa laga yaabaa in aad hadda seegtay waqtiga kama dambeysta ah.

Sida aad ku cubsoonaysiin karto caysanaanta

Isticmaal mid ka mid ah ikhtiyaaradan dib-u cusboonaysiinta:



Online-ka www.wahealthplanfinder.org

- Haddii aad leedahay koontada Washington Healthplanfinder, soogal ka-dibna xulo "Cusboonaysii Codsigeysga oo Dib-u-cusboonaysii Caynsanaanta" hoosta Linkiyada Degdegga ah
- Haddii aad leedahay koontada Healthplanfinder, guji "Hadda Codso", geli macluumaadkaaga ka-dibna xulo "Joogtey Codsigeysga oo Cusboonaysii Caynsanaanta" hoosta Linkiyada Degdegga ah



Isticmaalka app-ka telefoonka gacanta ee WAPlanfinder

- Haddii aad leedahay koontada Healthplanfinder ama aad doonayso in aad mid abuurato, isticmaal app-ka WAPlanfinder si aad u cusboonaysiiso caynsanaanta
- App-ka waxaa laga heli karaa App Store iyo Google Play



Ka wac Xarunta Taageerada Macmiilka Healthplanfinder 1-855-923-4633



Cusboonaysii dokumentiga dib-u-cusboonaysiinta ee boostada laguugu soo diray, saxiix ka-dibna soo celi adiga oo adeegsanaya mid ka mid ah ikhtiyaaradan:

- **Boostada:** PO Box 946, Olympia, WA 98507
- **Fakis:** 1-855-867-4467
- **CSO:** Ku rid sanduuqa dokumentiyada ee yaalla afaafka hore ee soo dhoweynta ee Xafiiska Adeegyada Bulshada DSHS ee degaankaaga: www.dshs.wa.gov/office-locations

Marka hawsha dib-u-cusboonaysiintaada la dhammeeyo, waxaa lagu soo diri doonaa ogeysiis si lagu ogeysiyo haddii adiga ama xubinka ka tirsan reerkaaga uu weli u qalmo caynsanaanta. Waa in aad dhameystirto dib-u-cusboonaysiintaada si aad u go'aamiso haddii aad u-qalanto caynsanaan caafimaad oo sii socota.

Wakhtitada kama dambeyska ee la seegay?

Haddii aad seegto wakhtiyada kama dambeyska ee dib-u-cusboonaysiinta oo adiga ama qoyskaaga aad waysiin caynsanaanta Apple Health, waxaad haysatiin 90 maalmood in aad ku dhameystirtiiin dib-u-cusboonaysiinta adiga oo adeegsanaya mid ka mid ah ikhtiyaarada dib-u-cusboonaysiinta. Haddii aad u-qalantid, caynsanaantaada waxay soconaysaa laga bilaabo maalinta aad wayso caynsanaanta iyada oo aan jirin meel bannaan.

Haddii aadan u-qalmin Apple Health, waxaad u-qalmi kartaa caynsanaan kale iyada oo loo marayo Qorshaha Caafimaadka U-qalma, oo leh ama aan lahayn caawimaad lagu bixinayo lacagta joogtada ah ee caymiska. Waa in aad dhameystirtid dib-u-cusboonaysiintaada si aad u aragto haddii aad u-qalanyo mid ka mid ah qorsheyaashan.

Su'aalo?

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan caynsanaanta Apple Health, fadlan la xiriir Xarunta Adeegga Daryeelka Macmiilka ee Gargaarka Caafimaadka ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka.

- **Telefoonka:** 1-800-562-3022
- **Foomka mareegtada ee sugan:** <https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/>